Waa mid ka mid ah Suugaanta uu hal abuuray Maxamed Maxamuud Xassan (Gani). Waxaa lagu allifay Caasimadda Puntland ee Garowe,sida arartaba laga milicsan karo, xilli ay halkaasi ka socotey tartan loogu xusulduubayey doorasho madaxweyne iyo gole shacab. Inkastuu munaasibaddaasi uu ku beegnaa gabaygu, haddana weli wuxuu yahay mid taagan, loona adeegsan karo in shuruudaha uu xambaarsan yahay la hordhigo cid kasta oo isu soo taagta ama u hanqaal taagta hoggaaminta shacabka danyarta ah ee Soomaaliyeed.
MMH Gani

YAA MURASHAX NOQON KARA??

Mahad oo dhan Eebbaa
Dhammaanteed mudnaan u leh
Musdafaa Rasuulkii
Micraajkii la dheelmiyo
Salli Muxammad baa mudan
Isimada murtidaloo
Shirka miradhalkiisiyo
Maslaxada u yimid baa
Maamuusid naga mudan
Ergada Madasha joogtaa
Lama gaaro midigtee
Marxabbiyo sallaan mudan
Maareeyayaashii
Hawsha Maamulkeediyo
Dejintii martida iyo
Lahaa kala maddayntana
Maqsuud baan ka wada nahay
Mahiiggaan onkoday iyo

Sida mayayga roobkoo
Milaygiisi da’ayana
Arartayda maqashee
Usogudub marxalad kale
Iyo madasha hawshaan
Laga maamulaayoo
Badiba loo martida yahay
Nugaal Mahad Ilaahay
Marsadeeda Nabaddaa
Barroosinka ku mudatoo
Malkadaynu joogniyo
Minankaan Garowena
Waa magaalo madaxdii
Maamulka Puntland-oo
Meeshay joqraafiga
Kaga taallo maabkiyo
Codkii mudanayaashoy
Heshay maalintii iyo
Mawlohoo la doontaa
Mudanaanta siiyoo
Marti soo dhoweyntana
Inay magac ku leedahay
Idinkay markhaantiya
Miinleyda curatiyo
Hakad meeriskaa geli
Murtidana la sii soco
Iyo dulucda maansada
Maqane iyo joogaba
Midbaa iga su’aal ahe
Yaa Murashax Noqon kara??!!

Millateriga baranaye
Yaa magac kaleeto leh
Maatadiyo cayrtiyo
Mucsarkiyo Indhoolkiyo
Miskiinkiyo agoonkiyo
Majaaniinta Waashiyo
Marreydii haweenkiyo
Miyi iyo Magaalaba
Makhluuqyada ku nool iyo
Mushtarkiyo mahaystaha
Iyo Mahayamooggaba
Mas’uul inuu ka wada yahay
Yaa maankiisa gelin kara??
Yaa maalkooda hayn kara?
Oo malab sidiisii

Aanay ugu macaanayn??
Yaan mu’ayidiintiyo
Kalagurin mucaarade
Kulli madax u noqon kara?
Hadday xaajo murugtana
Maaraynta yaa hela
Iyadoon ahayn muruq
Iyo xoog ku maamulid
Mawjada rogmanayiyo
Nabsi maalmo gudayiyo
In waqtigu marxalad yahay
Oon madax ahaantiyo
Madluun-nimadu waarayn
Uuna midiidin noqon karo
Isagoo maqsuud ku ah
Taajir magac lahaa shalay
Yaa maanta garan kara?
Oo madax hadduu helo
Nagu mooraduugayn?
Ama kii mucaarada
Mabda’iisu suu rabo
U adeegsan maafiyo?
Midkanaa I xiga iyo
Haybtayda mooyee
Inta kale martabad maleh
Meeshii manfacaliyo
Madaarkiyo Dekedahana
Annagaa ka madax noqon
Miyay ina maraysaa???
Inta maskax fayow iyo
Mayay aniga nala tahay
Inta kalese maaqaan!!!!!
Miyi iyo magaalaba
Dhaqankaan maroorsamay
Maaro yaa u heli kara?
Yaan kursigu u muuqane
Midda shacabka haysiyo
Ka naxaaya maatada?
Mabda’ yaan ku raacnaa?
Oon magac qabiil sidan?

Haddaan madax u doortana
Yaan macangag noqonayn
Afka yaan ku sedan malab
Uurkana maddiiliyo
Magli ugu qarsoonayn?

Oo midduu yiraahdiyo
Milladdiyo sharciga iyo
Dhaarta daba maryaynayn?
Oo ka madax sarrayn Karin
Sharci lagama maarmee?

Yaa mudnaan waxbarshiyo
Meesha caafimaadkiyo
Madaarkiyo marsada iyo
Jidadkii la marayiyo
Mahuraan degaankiyo
Mawaashiga ku nool iyo
Madhaafaanka siin kara?

Yaa madax horreetiyo
Mas'uul soo ahaan jirey
Oo gudaha magac ku leh
Maamuus bannaankana?

Nin maraykan degeyoo
Mar horeba dadkiisii
Masruuf ay cunaan iyo
Marashi ay xirtaan iyo
Mudnaantii waxbarashada
Makhsar yari ku helayiyo
Maatadiyo shacabkan
Dhibtu moxogga jebisoo
Tacliin aan ka maarmine
Makhsarkeedi waayo
Maalmo aan dab shidanoo
Maqaa ma dheregguna
Ugu maca ron yahay
Isku mawjad maahee
Mahuratdiyo ciiddaan
Yaa deggan mulkina ku leh??

Si aan madax u siinana
Mashaariicda beenta ah
Oo reer maqribigiyo
Yurub muddo ku fulin Karin
Anaa mirir ku qaban kara
Iyo yaan na maqashiin
Shacabka iyo maatadu
Hadal ay mashxaradaan
Oo maanka deeqoo
Maqalkana u roonoo

Macquul aan ahaan Karin
Lana mid ah macnaha guud
Baddaan malab ka dhigayaa???!!!!!!!!!!!!

Maanyada badweyntiyo
Arladaan muggeed iyo
Waxkastood ku miistaba
Muggood iyo barkoodoo
loo saaro midigtoo
Maalinle aad u bixisoo
Mushaarihii ma deeqdee
Cadli yaa ku maamula
Shacab wada muddici iyo
Dhammaan muddac calayhi ah
Oon lahayn markhaatiga
Qiraalkiina maya yiri
Muftigiina dhaartii
Yiri waan la marinayn?!!!!!

Mataan uur la seexdiyo
Hadday madal ku diriraan
Dubka miday wadaagaan
Yaa kala maslixi kara
Eexduna ka maran tahay?

Yaan mulaanka shacabkiyo
Ka xanaaqin murankoo
Muujin kara dulqaad iyo
Dadka inuu u madax yahay?

Culumada milgadaliyo
Yaa madaxda dhaqankiyo
Dadka muqayiliintiyo
Inta maqayiliinta ah
Mid waliba martabadiyo
Waxa uu ka mudan yahay
Yaa magane garan kara?

Maalgelin shisheeyiyo
Yaa muhandisiin iyo
Macdantoo la qodo iyo
Keeni kara mashaariic
Horay loogu mari karo
Oon ahayn midkii yiri
Baddaan malab ka dhigayaa?

Ninkii maqasha daayacay
Misna geela ii raaac
Yeelimayno manatee
Miinlayda gabaygiyo
Maansadu waxay tiri
Millateriga baranaye
Yaa murashax noqon kara
Oo magac kaleeto leh
Aan midigta saarnee

Abwaankii mudnaayee
Musdafiyo siduu yiri
Madaxweyne kol idhaha
Muraadkiisu nimu yahay
Maya baynu wada oran??
Madashiyo ujeeddada
Loo yimi makaankaan
Haddii ay murkucatiyo
Hadday miradhal noqotaba
Isimadaa mas'uul ka ah
Iyagana mid baan iri
Madaxweyne hadalkiis
Meeshaas aan ku daayee
Yaa mudanayaashii
Noqon kara meteli laa
Shacabka iyo maatada?
Wax la soo magoogiyo
Magalootiyaal iyo
Haddaad madasha keentaan
Dad mushaaro sugayoo
Maya aan ka oran Karin
Midigtaada ii goo
Iyo madaxa labadaba
Oowada muqaafil ah
Oo mudanayaashii
Laga dhigo meteli laa
Maatadiyo shacabkan
Meeshay wax mariyaan
Idinkaa mas'uul ka ah

Midna waa xasuusine
Abwaan baa marhore yiri
Nin mushaaro sugayoo
Jeebkiisu maran yahay
Weligaaba maya iyo
Haka sugin muddaafaco

Mid kalena waxay tahay
Haddaan milixda lagu darin
Waad ku miigataayoo
Macaan malaha soortuye
Waxa taas mataal u ah
Haba mira yaraatee
Haddaan maanka lagu hayn
Maguuraanka beelaha
Meesha looga badan yahay
Waxay mudan yihiin iyo
Inay milix sideedii
Yihiin lagama maarmaan
Miilaysi weeyee
Inta muruqa weyn iyo
Magaca is bidaayow
Macne yeelan maysaan

Madaxdeenna dhaqankow
Muwaafaqo haddii ay
Dhexdiinnii ka maqantahay
Shacabkoo midooboo
Yeesha mawqif qura iyo
Shirka miradhalkiisaba
Mugdi baa ku jiri kara

Murtidiyo intaasaan
Miinleydan gabaygiyo
Maansadi ku soo xiray

MMH Gani